DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

# XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

## SOLICITOR GENERAL OFFICE

## مكتب المحامي العام للدولة

# SHARCIGA TIRO-KOOBKA DOWLADDA PUNTLAND

## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZAETTE

## الجريدة الرسمية

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Puntland, Address: Madaxtooyada Puntland, Garowe
Email:gg.pl@plstate.so

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 19AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 08/10/2019 | Lam. 03 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# الجريدة الرسمية

## SHARCIGA TIRO-KOOBKA DOWLADDA PUNTLAND

## TUSMADA


| | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Tiro-koobka Dowladda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda<br>WAXBA MALEH |


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr.4 ee August 10, 2019, kuna saabsan Sharciga Tiro-Koobka Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80$^{aad}$

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/72/2019, kuna taariikhaysan 20/07/2019.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada Xeerkani u leeyahay Dowladda Puntland

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1$^{aad}$**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeeyn **Xeerka Tiro-Koobka** Dowladda Puntland.

**Qodobka 2$^{aad}$**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 3$^{aad}$**

Dhaqangal Sharcigan wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Dr. Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Tel: +252-90-7790151, E- Mail: mcladif@gmail.com, E-mail: DG.oop@plstate.so; oop@plstate.so; **Website**: www.plstate.so;

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

*Ref:*-XGGW/DPL/ 72 /2019 Garoowe, Sabti Date:- 20/07/2019

**Ku: Madaxweynaha Dawladda Puntland** **Garoowe**

**Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Tira Koobka Dawladda Puntland**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64-**aad.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha **Ref:** MWK/DPS/532/2015 ee December 01,2015 kuna saabsan soo gudbin Xeerka Tira Koobka Dawladda Puntland.

**MARKUU TIXGELIYEY:-** Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Tira Koobka Dawladda Puntland

**MARKUU ARKAY:-** Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhiga 44-aad Fadhigiisii 19-aad ee **20/07/2019** Xeerka Tira Koobka Dawladda Puntland.

**Wuxuu Guddoomiyey:-**

## Ansixinta Xeerka Tira Koobka Dawladda Puntland

**Allaa Mahad Leh**

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

**Md. Cabdixakiin Maxamed Axmed (Dhoobo)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Dawladda Puntland**

Tell:- +252 90 7792030, Email: qoobleex09@gmail.com Website:- www.puntlandparliament.net

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

# Xeerka Tira-koobka Puntland

**July 2019**

**Garoowe, Puntland**

# Tusaha


Xeerka Tira-koobka Puntland 2017 ........ 1

Cutubka 1-aad: Arrima Guud ........ 3

Cutubka 2-aad: Dhismaha Agaasinka ........ 5

Cutubka 3-aad: Shaqaalaha Xafiiska Tira-koobka ........ 8

Cutubka 4-aad: Xog Ururin ........ 9

Cutubka 5-aad: Isticmaalka Raadraac ama dukumenti Xafiis Dawladeed ........ 12

Cutubka 6-aad: Xafidaadda Xogta ........ 13

Cutubka 7-aad: Xadgudub, Ganaax , Go'aan Maxkamadeed iyo Caddeymo ........ 14

Lifaaq 1: Qaab-dhismeedka wasaaradda ........ 17

Lifaaq 2: Qaab-dhismeedka Waaxda Tira-koobka ........ 18

## Cutubka 1-aad: Arrimaha Guud

### Qodobka 1-aad
### Magaca Xeerka

(1) Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Tira-koobka Puntland.

(2) Waa xeer ku saabsan ururinta, iskuduwidda, soo-dheegida, soo-saaaridda iyo shaacinta Tira-koobka rasmiga ah iyo arrimaha la xiriira

(3) Awoodda Xeerkani waxay ku baahsan tahay dhulka Puntland oo dhan wuxuna khuseeyaa tira-koobta Dowladda Puntland.

### Qodobka 2-aad
### Ujeedada Xeerka

1. Ururinta xogta Dawladda, Muwaadiniinta iyo Kheyraadka dalka; & ka hortagidda iyo Tirtiridda Burcad-xogeedka;
2. Fududeynta helitaanka xog dhameystiran, waqtiyeysan, tayo ahaanna la isku hallayn karo oo saldhig u noqota Qorsheynta iyo Qiimeynta barnaamijyada horumarineed ee hay'adaha Dawladda;
3. Fududeynta barnaamijka Dimuqraadiyeynta Puntland iyo gaarista doorashooyin hal qof iyo hal cod ah.

### Qodobka 3-aad
### Eray Bixin

Xeerkan haddii aan si kale loo caddeyn—

"*Shaqaalaha dowladda*" waxaa loola jeedaa qof kasta oo jaga ka haya shaqooyinka madaniga mushahar joogta ahna ka qaata dowladda ;

"*xadgudub*" wuxuu yimaadaa marka loo hogaansami waayo ama la baalmarto shuruucda;

"*Nuqul*" waa daabicaad xog qoran, sawiran, kombiyuutar ku jira ama habkale;

''Madaxweyne" waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Dawlada Puntland

"*Faafin*" waa daabicaad, iibin ama shaaacin si toos ah ama si dadban xog rasmi ah.

''Wasiir'' waa wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha & Iskaashiga Caalamiga ah.

"Agaamimaha" waa agaasimaha Waaxda *Tira-koobka* ee Wasaaradda Qorshaynta Horumarinta Dhaqaalaha & Iskaashiga Caalamiga ah (WQH/DH&IC); "*Hawlfallo*" waa awoodo iyo xilal;

"Maamul hoosaad" waa maamul deegaanka oo ku cad ujeedada uu maamulkaass u heelan yahay;
"Tira-koobka rasmiga ah" waa Tira-koobka dhabta ah oo uu isuduway xafiiska Tira-koobka ama xafiis dowladeed oo kale oo ku xusan xeerkan ama xeerkale;
'**M**uunad''' waaa qayb laga qaato wixii markaa laga rabo macluumad loo baahan yahay;

"Sahan"waxaa loola jeedaa marka dadweynaha ama waxkasta oo laga raadinayo xog laga qaato muunad ama qeyb kamid ah, iyadoo la adeegsanayo farsamooyinka Tira-koobka;

"Tiro-koob" waxaa loola jeedaa marka dadweynaha dhammaan la tiriyo ama xogka looga soo ururiyo si madax-kakow ah , iyadoo aan cidna laga tegeyn.

"Qof hawlwadeen ah" waa ruux waqti khaas ah hawl ka fulinaaya xafiis uu ka mid yahay ruuxa mulkiilaha ah ama cidda kiraysatay;

"Dhisme" waa dhisme kasta oo ku yaal Puntland;

"Maamulka Dawladda" waa wasaarad, dowladda hoose, iyo hay'ad dowladeed oo sharciyeysan;

"Xog keydsan" waxaa ka mid ah waraaq, sawir, qoral kombiyutar, ama wixii kale oo samaykara raad la raaco ama xog si kastaba u kaydsan, foom, su'aalo, amarbixin ama dokumenti la mid ah kuwaas;

"Tira-koobka" waxaa ka mid ah lambaro, oraah aan loo rogi karin lambaro oo la isuduwikaro, la falaqayn ama la fasirikaro;

## Qodobka 4-aad
## Xeer la buriyey

xeerkani wuxuu caddeynayaa xogo, su'aalo, foomam ama raadraac la urursahay iyadoo la isticmaalayo xeerar la buriyey inaan loo isticmaali karin xeerkan.

## Cutubka 2-aad: Dhismaha Agaasinka

### Qodobka 5-aad
### Waaxda Tira-koobka

(1) Xafiiskani waa Waaxda Tira-koobka Wasaaradda Qorsheynta, Iskaashiga Caalamiga ah & Horumarinta Dhaqaalaha.oo fulinaysa hawlaha xeerkani u idmaday.

(2) Agaasimaha Waaxda Tira-koobka oo lagu magacaabay sifaha ku cad xeerkan wuxuu masu'ul ka yahay maaraynta iyo ilaalinta hawlaha xafiiska.

### Qodobka 6-aad
### Shaqaalaha Waaxda Tira-koobka

(1) Shaqaalaha Waaxda Tira-koobka waxaa lagu qaadanayaa xeerka u yaala shaqada iyo shaqaalaha.

(2) Shaqaalaha xafiiskani waxay kamid yihiin shaqalaaha wasaaradda, waxayna waajibaadka iyo xuquuqda kala midyihiin shaqalaaha kale ee Dawladda Puntland

(3) Shaqaalaha xafiiskan waxay ka amar qaadanayaan Agaasimaha Tira-koobka, Agaasimaha Guud iyo Wasiirka.

### Qodobka 7-aad
### Waajibaadka Xafiiska

(1) Hawlaha xafiisku waa ururinta, isuduwidda, soosaaridda, falaqaynta iyo shaacinta macluumaaadka Tira-koobka dhaqaalaha, arrimaha bulshada, hawlaha guud iyo xaaladda ay markaa ku sugantahay Puntland.

(2) Xafiiskan wuxuu leeyahay awoodda isuduwidda iyo dib u eegida Tira-koobka rasmiga ah ee ay soo saareen hay'adaha dowladda, kuwa aan dowliga ahayn, kuwa gaarka ah iyo xeel-dheerayaasha tira-koobyada si loo xaqiijiyo heerka tayada tira koobka iyo in si habboon loo kala habeeyo xogta.

(3) Xafiiskani waa kaydiyaha Tira-koobka rasmiga ah ee Dowlada Puntland iyo Soomaalia.

(4) Xafiisyada tiro-koobka wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawladu waxay wada shaqayn toosa la yeelanayaan Waaxda Tira-koobka ee Wasaarada Qorshaynta.

(5) Xafiisku waa meesha laga heli karo hababka loo ururiyo iyo qalabka casriga ee loo isticmaalo ururinta xogta.

## Qodobka 8-aad

### Iskaashiga iyo xiriirka hay'adaha kale ee dowladda iyo shakhsiyaadka

(1) Xafiiskan wuxuu kaloo xiriiriyaa hay'adaha kale ee dowladda iyo shakhsiyaadka dhanka ururinta, isu keenida, soosaaridda, falaqaynta iyo shaacinta xogta.

(2) Xafiiskani wuxuu kaloo xiriirinayaa soo saarayaasha iyo isticmaalayaasha xogta Tira-koobka.

## Qodobka 9-aad

### Agaasimaha Tira-koobka

(1) Agaasimaha Tira-koobka ee Wasaaradda Qorsheynta, Iskaashiga Caalamiga ah & Horumarinta Dhaqaalaha. waxaa soo jeedinayo magacaabistiisa Wasiirka waxaana magacaabaya Madaxweynaha Puntland.

(2) Waxaa xafiiskan xilkiisa qabanaaya ruux ah shaqaale dowladeed wax badana ka yaqaan cilmiga Tira-koobka.

(3) Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Iskaashiga Caalamiga ah & Horumarinta Dhaqaalaha. wuxuu u wakiilan karaa Arrimaha Istaatiskada la xiriira Agaasimaha Tira-koobka.

b) Awoodahaasi sida Wasiirka u wakiishay ayuu Agaamisaha Tira-koobka u fulinayaa;

t) Agaasimaha Tira-koobka, sidoo kale, waxaa loo wakiishay awoodda maamul ee xafiiska iyo shaqaalaha hoos yimaada

## Qodobka 10-aad
## La tashiyo

1. Agaasimaha Tira-koobku wuxuu la tashanayaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha & Iskaashiga Caalamiga ah,unugyada waaxda tira-koobka, shaqaalihiisa iyo xeel-dheerayaasha markuu fulinayo hawlahan;

b Ururinta xogta

t Habraaca iyo qeexidda Tira-koobka

j Xadiga daabicaadda iyo Shaacinta Tira-koobka;

x. Waqtiyaynta iyo habka shaacinta Tira-koobka.

## Qodobka 11-aad
## Wakiilashadda Agaasimaha Tira-koobka

(1) Agaasimaha Tira-koobku wuxuu u wakiilan karaa shaqaalihiisu in ay fuliyaan hawlaha loo idmay sida ku cad xeerkan.

(2) Awoodda ku xusan faqradda (1-aad) ee qodobkaan—

b) Agaasimaha Tira-koobka ayaa qeexaya shuruudaha fulinta hawlaha u idmashada;

t) Wakiilashada noocaas ahi wax awooda ka qaadi mayso Agaasimaha Tira-koobka;

j) Agaasimaha Tira-koobka waa ka noqon karaa markuu doono wakiilashadaasi.

## Qodobka 12-aad
## Sugnaanta Warqadda xafiiska

Qoraaladda u soo saaro Agaasimaha Istaatistikadu ama cidduu wakiisho inay fuliyaan hawlaha xafiiska oo ku cad xeerkan waa inuu ka muuqdaa magaciisa oo daabacan lehna saxiix iyo shaabad.

## Cutubka 3-aad: Shaqaalaha Xafiiska Tira-koobka

### Qodob 13-aad

Shaqaalaha xafiisku waa Qof kasta oo ka mid ah dadka hoos ku xusan—

b) xubin kasta oo ka tirsan xafiiska iyo Qof kasta oo xil ka haya xafiiska xagga ururinta ama soosaaridda xogta Tira-koobka
t) xubin kasta oo xafiisku la galay heshiis ku saabsan ururinta, soosaaridda, isuduwidda xogka iyo falaqaynta xogta.
j) Xubin kasta oo qoraal ka haysta Agaasimaha Guud iyo wasiirka inuu fuliyo lafaguridda xogta mudda cayiman.

### Qodobka 14-aad
### Caddaynta Xafidaada Sirta Xafiiska

Waxaa laga rabaa qof kasta oo shaqo ka billaayo xafiiska Tira-koobka inuu saxiixaa caddaynta soo socota—

"Anigoo ah,______________________, waxaan caddeynayaa inaan u gudanayo xilkayga shaqaale anoo u hoggaansamaya shuruudaha layga rabo sida ku cad Xeerka Tira-koobka Puntland iyo awaamiirta hoosyimaada inaanan marna u bandhigayn ama siinayn cidna xataa qoyskayga, reerkayga ama hawlwadeenada ila wada shaqada".

### Qodobka 15-aad
### Caddeyn ballan

(1) Shaqaalaha xafiisku waxay xaq u leeyihiin sida ku cad xeerkan arrimaha soo socda—

b) Inay ka codsan karaan ama ku casumikaraan qof kasta inuu soo buuxiyo warqado kuna soo celiyo oraah ama qoraal.

t) Inay kormeeraan, daabacdaan ama kala baxaan xog, uruuriyaan ama ka helaan waraaqo xafiiseed qof kasta, ama

j) Inay galaan dhisme, Iyagoo wata warqad ay ku caddahay saxiixa Agaasimaha tirakoobka oo naqshadaysan ama daabacan

(2) Shaqaale kasta oo ku hawlan Tira-koobka wuxuu muujinayaa warqadda Agaasimaha tirakoobka haddii laga codsado caddeyn.

(3) Warqadda xafiiska, haddii aan wax ka duwan jirin, waxay muujinaysaa caddeyn waafi ah.

## Cutubka 4-aad: Xog Ururin

**Qodob 16-aad**

**Foomam (shaxo)**

Agaasimaha Tira-koobka wuxuu diyaarinayaa foomam, su'aalo iyo raadraac kale oo ku saabsan ururinta xogta sida ku cad xeerkan, wuxuuna raacsiinayaa buuxinta foomaamka (shaxda) waqtiga la rabo in loo soo celiyo xafiiska.

**Qodabka 17-aad**

**Ogalaanshaha Xog-ururinta**

(1) Ma jirto hay'ad dawladeed, mid shacab, mid ajanabi iyo mid gaaraba oo ka billaabi karta xog-ururin cusub ama wax ka bedelli karta xog hore u kaydsanayd gudaha Puntland iyadoo la isticmaalayo su'aalo qalab xog ururin ama qalab kale oo si toos ah u gudbiya xogta iyadoo aan ogalaansho qoraal ah laga helin wasiirka Wasaarada.

(2) Ciddii doonaysa inay ururiso xog cusub ama isticmaasho xog hore u jirtey waa inay qoraal u soo gudbiyaan Waaxda Tira-koobka ee Wasaarada, iyagoo ku caddaynaya qoraalkooda waxyaabaha hoos ku qoran;

b) Sababta loo ururinayo xogta;
t) xog noocee ah ayaa la ururinayaa yaase laga ururinayaa;
j) Yaa ururinaya xogta, Xaggee laga Ururinayaa, goormaase la ururinayaa xogta.
x) Dhib iyo faaa'iido intee le'eg ayaa uga iman karta ka qayb galayaasha;
kh) Tallaabooyinka la qaadayo si loo illaaliyo astaamaha (xogta) qofka ka qayb qaadanaya.
d) Iyo sida loo istimaaclayo xogta la qaaday.

**Qodabka 18-aad**

**Su'aalaha sahanka iyo Tiro-koobka**

Marka laga qabanayo dalka tirokoob ama sahan, waxa la rabaa in qofku ka jawaabo dhammaan su'aalaha la waydiinayo isagoo run ka sheegaya sida ku cad xeerka.

**Qodobka 19-aad**

**Xog bixinta si mutadawacnima ah**

(1) Agaasimaha Tira-koobku ama shaqaalaha xafiisku waxay ka codsan karaan qof—

b) Inuu soo buuxiyo foomam (shax), su'aalooyin iyo raadraac,

t) Inuu ka jawaabo su'aalaha,

j) Inuu bixiyo xog ama raadraac, si mutadawacnima ah iyo inaysan u bandhigi karin xogta la helay cid kale sida ku cad xeerkan

(2) Qofku wuxuu siin karaa Agaasimaha Waaxda Tira-koobka ama shaqaalaha xafiiska xog ama raadraac marka loo baahdo, nuquladooda sida ku cad xeerkan.

**Qodobka 20-aad**

**Amarka wasiirka oo ku saabsan xog bixin**

(1) Wasiirku wuxuu bixin karaa amar in qof kasta bixiyo xog sida ku cad xeerkan, gaar ahaan—

b) Nooca xogta loo baahanyahay;

t) Inta jeer oo loo baahanyahay;

j) Shakhsiga ama hawlaha, ama koox looga baahdo inay bixiso xog.

(2) Amar gaar ah sida ku cad *faqrad (1)* ee Cutubkaan waxaa lagu qeexayaa—

b) Waqtiga dalka laga bilaabayo sahan ama tirokoob;

t) Muddada u dhexeysa laba sahan ama tirokoob illaa tirokoob.

**Qodobka 21-aad**

**Awaamirta xog ururinta**

(1) Agaasimaha Tira-koobka ama qof ka mid ah shaqaalaha xafiisku wuxuu amri karaa isagoo tixraacaya xeerkan qof—

b) Inuu soo buuxiyo soona celiyo foom, su'aalooyin ama raadraac,

t) Inuu ka jawaabo su'aal kasta,

j) Inuu bixiyo raadraac kasta, nuqulkooda ama qayb laga soo saaray, waqti iyo muddo cayiman.

(2) Iyadoo la tixraacayo xeerkan dariiqada bixinta xogta la codsaday waxaa ku filan—

b) Haddii shakhsi yahay — waxaa loo dirayaa cinwaankiisi ugu danbeeyay uu deganaa, ka shaqeeyo ama ku ganacsanayeey;

t) Haddii shakhsiga bixinaaya xogta uu masu'ul ka yahay dhismaha — waxaa loogu hagaajinayaa dhismaha ama xafiiskiisa ama degaankiisa iyadoo xusidda magaca laga maarmo;

j) Haddii shakhsigu yahay ganacsade — waxaa loogu hagaajinayaa xafiiska ganacsigiisa ama dhismahiisa iyadoo la isticmaalayo magaca ganacsiga ama shakhsi kasta oo ka tirsan maamulka ama degaankiisa;

x) Haddii shakhsigu ka hayo hawl kale — waxaa loogu hagaajinayaa xafiiskiisa ama degaankiisa ayadoo xusidda magaca laga maarmayo.

**Qodobka 22-aad**
**Qofka Bixinaya xogta**

(1) Xogta uu codsanaayo Agaasimaha Tira-koobku isagoo cuskanaaya xeerkan waxaa bixin kara;

b) Shakhsi gaar ah — qofkaasi waa inuu deganyahay waqtigaas Puntland, hadduu dalka ka maqanyahay, xaaskiisa ,qaraabadiisa oo wax ka degan guriga, ama haddii uu dhintay qofka wakaaladiisa haya ama haya xogta la doonaayo;

t) Qof masu'ul ka ah dhismaha — qofkaasi waa inuu bixiyaa xogta dadka degan ama ka shaqeeya dhismaha, sidoo kale qof kasta oo degan dhismahaas ay ugu waajibayso inuu siiyo xogta loo baahanyahay cidda haysa masu'uliyadaas;

j) Xafiis — qof kasta oo haya xogta loo baahanyahay:

(i) Hawlwadeenada shaqo oo dhan sida mulkiilayaal, maamulaayaal iyo maareeyayaal;

(ii) Hawlwadeenada kale oo dhan.

(2) Haddii xog shakhsi gudbiyey sida ku cad xeerkan oo aan xafiisku helin Agaasimaha Tira-koobka wuxuu codsankaraa markale in xogta la soo gaarsiyo waqti mucayan ah.

**Qodobka 23-aad**
**Soosaarid iyo gudbin ballamo iyo qoraalo kale**

Ballan kasta ama raadraac uu gudbiyey shaqaalaha xafiisku, haddii aan la helin arrin ka duwan taa, waa caddeyn ku filan in waraaqahaasi u diray Agaamisaha Tira-koobka ama qof ka wakiila agaasimaha.

**Qodobka 24-aad**

**Fasax u haysasho xog ururin**

Shaqaalaha xafiisku wuxuu waqtiga shaqada gelikaraa dhisme kasta isagoo muujinaaya warqadda fasaxa haddii laga codsado isago—

b) gaynaya warqad ballan sida ku cad xeerkan, ama

t) geynaya ama ururinaya foomam (shax), su'aalo, raadraac ama xog kale,

j) ama wareysanaya qof sida ku cad xeerkan

**Cutubka 5-aad: Isticmaalka Raadraac ama dukumenti Xafiis Dawladeed**

**Qodobka 25-aad**
**Fasax raadraac dawladeed**

(1) Agaaasimaha Tira-koobku wuxuu u qori karaa warqad, sida ku cad xeerkan, xafiis kasta oo dawladeed—

b) Si loogu oggolaado shaqaalaha xafiiska inay gelikaraan xafiiska waqtiga shaqada si ay u kormeeraan kana qaataan nuqul ama qayb raadraaca la hayo,

t) Iyo in la siiyo nuqul ama qayb ka mid ah raadraac uu xafiisku hayo haddii shaqalaaha xafiiska Tira-koobku codsado.

(2) *faqradda (1)* ee qaybtan—

b) Ma fasaxayso raadraaca maxkamadaha, arrimaha la xiriira sirta amniga, maamulka xabsiyada iyo shaqaalahooda ;

t) Waxay fasaxaysaa raadraac caafimaad oo aan la bandhigin haddii wasiirka caafimaadku oggolaado;

**Qodobka 26-aad**
**Iskaashi hay'adaha dowladda iyo Xafiiska**

(1) Agaaasimaha Tira-koobku wuxuu ka codsan karaa haya'daha dowladda inay wada sameeyaan wadatashi iyo iskaashi xagga soosaaridda xogta si loo xaqiijiyo habboonantooda iyo habka ugu wanaagsan oo loo soo saaro raadraaca loo baahdo.

(2) Haddii hay'ad dowladeed ay soo jeediso soosaaridda, dib-u-eegidda ama shaacinta habkasta oo loo saameeyo kaydka xogta iyo la soo bixidda xogta ama inay sameyso sahan waa inay kala tashataa waaxda Tira-koobka ee Wasaarada Qorshaynta waana inay oggolaato tala kasta oo la siiyo.

(3) *faqraddaha (1)* iyo *(2)* ee —Cutubkan

b) Ma fasaxayaan raadraaca maxkamadaha, maamulka xabsiyada;

t) Waxay u hogaansamayaan shuruuc kasta marka laga reebo xogta keeni karta khalkhal iyo nabadgelya xumidda Puntland.

## Cutubka 6-aad: Xafidaadda Xogta

### Qodobka 27-aad
### Ballan-qaadka sida loo isticmaalayo xogta

Xog kasta oo uu bixiyo shakhsi, shirkad ama hay'ad dowladeed waxaa loo isticmaalayaa oo keliya isuduwidda iyo lafagurka Tira-koobka sida ku cad xeerkan.

### Qodobka 28-aad
### Xafidaadda Xogta dadka

(1) Xog kasta oo la helay sida ku cad xeerkan oo uu ka muuqdo qof magaciisu lama shaacinkaro, lamana tusi karo cid kale, haddii aan laga haysan qoraal oggolaanaya qofkaas ama wakiilkiisa ama qof reer ahaan ugu xiga, marka laga reebo —

(a) Arrin khusaysa maxkamad sida ku cad xeerkan;

(b) shaqaalaha xafiiska oo hawshiisa gudanaaya sida ku cad xeerkan;

(c) Diiwaangelinta xogta uu isticmaalayo xafiisku waxay ku fadhidaa qoraal Agaasimaha Tira-koobku ku ballanqaadayo xafidaada sirta.

(2) Xafiisku wuxuu u cayimayaa astaamo xogta la ururiyay sida ku cad xeerkan iyadoo loo kala saarayo habka maamul ee haya'daha kale ee dawladda mid hawlo dhaqaale iyo baaxadda qaybaha.

(3) Madaxweynaha Puntland wuxuu fasaxi karaa xog la diiday in la shaaciyo oo lagu helay dariiqa uu jideeyay xeerkani.

(4) Xeerkani meelna ku xusimaayo hab u oggolaanaya shakhsi ama shirkad inay u diido xogta maxkamad ama u isticmaasho si gaar ah.

### Qodobka 29-aad

### Isticmaal xog aan la garan cidda soo saartey

Xafiisku wuxuu bixinkaraa xog uu u helay si toos ah ama si dadban, isagoo kaashanaaya xeerkan, qof ama shirkad aan la garaneyn haybtooda waxaana fasaxi kara isticmaalka xogtaas Wasiirka.

## Qodobka 30-aad
## Fasaxida xogta tirakoobka dadka mudo dheer ka dib

Xayiraadda saaran qayb ka mida ah xogta tirakoobka dadka, oo lagu fuliyay xeerkan, waxaa laga qaadayaa 100 sano ka dib marka la sameeyay tirakoobka.

**Cutubka 7-aad: Xadgudub, Ganaax, Go'aan Maxkamadeed iyo Caddeymo**

## Qodobka 31-aad
## Diidmada xog loo baahan yahay

Qof kasta oo diida inuu bixiyo xog uu hayo oo agaasimaha waaxdu uga codsaday sifa sharci ah sida ku cad xeerkan wuxuu noqonayaa eedaysane.

## Qodobka 32-aad
## Diidmo xog ururin

Qof kasta oo u diida shaqaalaha xafiiska inay waajibkooda xog-ururineed gutaan sida ku cad xeerkan wuxuu noqonayaa eedaysane.

## Qodob 33-aad
## Isticmaal xumo xog

Cid kasta oo ku xad gudubta xog kusalaysan xeerkan ama si bareer ah u shaacisa astaamaha shakhsi ama shirkad xog bixisay wuxu noqonaya edeysane

## Qodobka 34-aad
## Ku tagrifalka xafiiska

Haddii Qof ka mid ahi Shaqaalaha xafiiska isagoo isticmaalaya magaca xafiiska ku raadsado xog ama isku daya inuu ku helo xog si ka baxsan waajibaadka loo idmay wuxuu noqonayaa eedaysane.

## Qodobka 35-aad
## Xanibaad Agaasimaha Tira-koobka ama shaqaalihiisa

Qof kasta oo si bareer ah u xaniba Agaasimaha Tira-koobka ama shaqaalihiisa mid ka mid ah gudashada hawshooda sida ku xusan xeerkan wuxuu noqonayaa eedaysane.

**Qodobka 36-aad**
**Sheegasho shaqaalaha xafiiska**

Qof kasta oo aan ahayn shaqaalaha xafiiska lakiin sheegta inuu yahay shaqaalaha xafiiska wuxuu noqonayaa eedaysane.

**Qodobka 37-aad**
**Xafiidaada qoraalada**

(1) Qofkii si bareer ah u baabi'iya, dhaawaca ama ka been abuura qoraal ama raadraac loogu talagalay xog ururin loo baahanyahay sida uu qabo xeerkan wuxuu noqonayaa eedaysane.

(2) Qof kasta oo xafidi-waaya qoraallada ama raadraaca lugu soo ururiyay iyadoo la cuskanaayo xeerkan, lagana ilaalinaayo in uu arko ruux aan ruqsad u qabin, wuxuu noqonayaa eedaysane.

(3) Shaqaale kasta oo xafiiska si bareer ah ugu soo celin waaya qoraal ama xog laga soo uruuriyay shakhsiyaad ama shirkado iyadoo la raacayo xeerkan wuxuu noqonayaa eedaysane..

**Qodobka 38-aad**
**Bixin xog been ah**

Qof kasta oo laga codsado inuu bixiyo xog iyadoo la cuskanaayo xeerkan oo bixiya xog qoraal ama oraah been ah isagoo og inay been tahay wuxuu noqonayaa eedaysane.

**Qodobka 39-aad**
**Ururin- xog Ogolaansho La'aan**

Ciddii Xog ka ururisa meel ka mid ah gudaha Puntland, iyadoo isticmaalaysa su'aalo kombayuur, waraaqo su'aaleed ama qalab kale oo si toos ah ugudbiya xogta iyadoo aan ogalaansho iyo faaf-reeb ka helin Wasaarada Qorsheynta, Iskaashiga Caalamiga ah & Horumarinta Dhaqaalaha Puntland wuxuu noqonayaa eedaysane.

**Qodobka 40-aad**
**Codsi Maxkamadeed**

Qofkii ama hay'adii noqota eedaysane iyadoo la tixraacayo xeerkan Wasiirku ama

Agaasimaha guud wuxuu u gudbinayaa xeer illaaliyaha sida ugu dhakhsaha badan si looga qaado talaabo sharciga waafaqsan.

## Qodobka 41-aad
## Ganaax

Qofkasta oo faldambiyeed ka gala xeerka Tira-koobka iyadoo maxkamadu eegeyso culeyska faldambiyeedka wuxuu muteysanayaa mid ka mid ah ama dhammaan ciqaabahan soo socda;

(b) Xarig (t) Soo celin hanti (j) ganaax Maaliyadeed (x) shaqo joojin mudo cayiman

## Qodobka 42-aad
## Caddaymo

Tira-koobka rasmiga ah waxaa cadeyn u isticmaali kara maxkamadaha sharciga ah iyadoo uu saxiixayo Agasimaha Guud loona gudbinayo Xafiiska Xeer ilaalinta guud si cadaymaha faldambiyeedka loo hordhigo maxkamada Awooda u leh


## Qodobka 43-aad
## Dib-u-eegista Xeerka Tira-koobka

Wasiirku wuxuu qorayaa warqad dib loogu eegayo xeerka Tira-koobka haddii loo baahdo. Markaa ka dib, waaxda tira-koobku waxay dib-u-eegid ku sameyn kartaa ururinta, isuduwidda, soosaaridda, falaqaynta iyo shaacinta macluumaaadka Tira-koobka ay waaxdu soo saartay iyo tan waaxaha kale ee dawladu soo saareen.

## Qodobka 44-aad
## Dhaqan-galka xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa Marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Lifaaq 1: : Qaab-dhismeedka wasaaradda



Lifaaq 2: Qaab-dhismeedka Waaxda Tira-koobka

